# SHARCIYADA GARGAARKA MAALIYADDA

**UJEEDADA:**

Sharciyadda Gargaarka Maaliyadda waa midka lagu maamulo gargaarka maaliyadda ee mid kasta oo ka mid ah xarumaha CentrCare, taasoo waafaqsan sharciyada uu soo saaray Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota iyo Waaxda Adeegga Canshuuraha.   Qoraalkan, xarumaha waxaa loolaa jedaa mid kasta oo ka tirsan ama gaar ka ah CentraCare.

**SHARCIYADA**

CentraCare waxaa ka go'an in ay u fidiso adeeg loo siman yahay dhamaan bulshada ay u adeegto.  Gargaarka Maaliyadeed waxaa loo fidiyaa kuwa u baahan ee xaaladda degdegga ah ee caafimaadka iyo adeegga caafimaadka ee muhimka ah.  Hay'adaha CentraCare waxa ay ogol yihiin mas'uuliyadda ka saaran daryeelka bukaanka iyada oo aan loo eegin awoodda dhaqaale ee bukaanku ku bixin karo adeegaas.  Sidaa darteed, Hay'aduhu waxa ay u fidinayaan gargaarka maamilyadeed kuwa ka soo baxa shuruudaha u degsan ee hoos ku xusan.

**XARUMAHA**

CentraCare – Clinic CentraCare – Shaqaalaha CentraCare – Long Prairie CentraCare – Melrose CentraCare - Monticello CentraCare – Paynesville CentraCare -Plaza Surgery Center CentraCare – Sauk Centre CentraCare – Isbitaalka St Cloud  –CentraCare - St. Benedicts Community – CentraCare – St Benedicts Community Therapy Suites Sartell - Carris Health Clinics – Isbitaalka Carris Health Rice Memorial – Carris Health Redwood Falls –Xarunta  Carris Health Rice Care

**TILMAAMAMAHA LA RAACAYO:**

A. Hay'aduhu waxa ay ku dadaalayaan in ay aqoonsadaan bukaanka u baahan  gargaarka maaliyadeed. Hay'aduhu waxa ay siinayaan bukaanka ama wakiiladooda codsiga gargaarka maliyadda iyo sharciyada u degsan gargaarka maaliyadda ee bukaanka  iyagana ayaana ka siinaya wixii talo ah.   Codsiga iyo sharciyada u degsan waxa aad ka heli kartaan bogga internetka ee CentrCare ee bukaanka si aad ula soo dagtaan waana mid lacag la'aan ah.   Hay'addu waxa ay bukaanka la socodsiineysaa sida loo codsado gargaarka, macluumaadka la doonayo in la soo raaciyo codsiga iyo halka loo dirayo codsiga.   Waxa kale oo hay'addu codsan  kartaa foomka canshuurta aad ku xareysay, qeybta dambe ee jeegga mushaharka, dakhliga Ceymiska Bulshada, Warbixinta bangiga, Foomamka talaabo lagaa qaado, Foomka Go'aanka Degmada, Foomka Ceymiska Shaqaalaha, Foomamka Gargaarka Dadweynaha, Foomamka Taageerada dhaqaale ee Caruurta, Foomamka naafada ama dhaqaalaha hawlgabka.     Iyada oo lagu saleynayo macluumaadka aad ku soo gudbisay codsiga iyo foomka canshuurta aad xareysay, go'aan ayaa codsi kasta gooni ahaantiis looga gaarayaa haddii uu bukaanku ka soo baxo shuruudaha ku xiran gargaarka maaliyadeed iyada oo la raacayo jadwalka ku xusan Lifaaqa A. Dadka ka soo baxa shuruudaha ee adeeg loogu qabto isbitaalada CentraCare lagama qaadayo lacag xaaladaha degdegga ah iyo adeegga caafimaadka ee muhimka ah, iyada oo la adeegsanayo habka dib loogu noqdo (oo celcelis ahaan biilasha lagu sameeyo) AGB sida lagu xusay sharciga 501r ee lacagta biilka qofka loo diro dadka heysta ceymiska bixiya xaaladaha degdegga ah iyo daryeelka caafimaadka ee muhimka ah.       Shuruudaha ku xiran gargaarka maaliyadeed ma ah kuwo ku saleysan da'da, jinsiga, qowmiyadda, doorashada jinsiga ee qofka, ama diinta uu aaminsan yahay.   Adeegga muhimka ah ee caafimaadka waa mid loo codsan karo gargaarka maaliyadeed.   Caafimaadka aan muihimka aheyn ama is qurxinta ma khuseeyaan sharciyadan.

B. Codsashada Gargaarka Maaliyadda

a. Si loo codsado gargaarka maaliyadda, waa in bukaanku foomka ka buuxiyaa (oo ay wehliyaan qoraalada cadeynta u noqon kara) barta internetka ee isbitaalka, uu geeyaa mid kasta oo ka mid ah hay'adaha CentraCare ama boosta ku soo diraa 1406 6th Ave North St Cloud, MN 56303 ama 301 Becker Ave SW Willmar MN 56201 Attn: Xafiiska Xisaabaadka (Business office), qof ahaan geeyaa ama boostada ku soo diraa.

b. Codsiga waxa aad ka heli kartaa barta internetka ee http://www.centracare.com/pricingfinancialassistance/ ama ku soo diri kartaa iimeylka: BillingandPaymentinquiries@centracare.com ama mid kasta oo ka mid ah Xafiiska Xisaabaadka CentraCare (Business Office).

C. Shuruudaha Ku Xiran:

a. Si laguugu tixgeliyo in aad ka soo baxday shuruudaha gargaarka maaliyadda:

   i. Codsiga oo aad buuxiso soona raaciso dhamaan qoraalada cadeymaha ah ee taageeraya. Codsadahu waa inuu soo gudbiyaa cadeymaha soo socda:

      1. Nuqul ka mid ah canshuurtii ugu dambeysay ee aad xareysay, haddii ay ku khuseyso.
      2. Cadeyn muujineysa dakhliga codsadaha (iyo xaaska/sayga haddii uu jiro) sida qeybta dambe ee 4 jeeg ee mushaarka ee u dambeeyey, warbixinta ceymiska bulshada, ama macluumaad cadeyn kara sida bukaanku u bixiyo kharashkiisa nolosha.
      3. Nuqul 3dii warbixin ee ugu dambeysay ee bangiga.
      4. Cadeyn muujineysa inuu ka soo baxay shuruudaha ceymiska caafimaadka Medicaid

b. Bukaanku waa inuu la shaqeeyaa CentraCare si la isugu dayo habab kale ee lagu caawin karo, haddii ay muhim tahay, oo ay ka mid yihiin Mediacre iyo Medicaid. Bukaanka waxaa laga doonayaa inuu soo gudbiyo macluumaadka muhimka ah iyo qoraalada loo baahan yahay marka uu codsanayo gargaarka maaliyadeed ama barnaamijyada lacag bixinta ee dawladda iyo dadweynaha.

c. Waa in laga quustaa in ceymisku bixiyo lacagta.

d. Waa in bukaanku raacaa nidaamka u degsan ceymiska uu heysto oo ay ka mid tahay inuu ka jawaabo dhamaan codsiyada la soo weydiisto mudada loo qabto.

e. CentraCare ayaa go'aan ka gaarta sida bukaanku uga soo baxay shuruudaha gargaarka maaliyadda taasoo ku saleysan dakhliga iyo hantida qoyska.

   i. Haddii qoysku leeyahay hanti lacag caddaan ah loo bedeli karo (loo bedeli karo caddaan) ee xisaabta bangiga, guri kale/dhulka, guri lagu nasto, iyo xisaabta hawlgabka oo ka badan $500,000 kama soo bixin shuruudaha ku xiran gargaarka maaliyadda.
   ii. Haddii hantida lacag caddan ah loo bedeli karo >$300,000 kharashka waa la soo gudbinayaa waana la qiimeynayaa. Haddii saamiga deynta/dakhliga bukaanku tahay < 45% kama soo bixin shuruudaha.

f. Iyada oo la eegayo nidaamkan, qoyska waxaa loo tixgelinayaa:

   i. laba qof oo isu dhaxa iyo caruurtooda, sida ay u aqoonsan tahay qoraalada IRS.
   ii. Qof heysta caruur, sida ay u aqoonsan tahay qoraalada IRS.
   iii. Qof aan xaas laheyn oo caruurna aan laheyn

D. Shuruudaha Ku Talo Galka Ah

a. Haddii uu bukaanku ka gaabiyo inuu keeno macluumaadka ku filan ee taageeraya shuruudaha ku xiran gargaarka maaliyadda, waxaa laga yaabaa in ay u dirto ama kaashato dhinac sadexaad oo barnaamijyada ee ka caawin kara inuu ka soo baxo shuruudaha marka:

   i. Bukaaanku yahay qof aan hoy laheyn.
   ii. Bukaanku ka soo baxay shuruudaha barnaamijyada kale ee gobolka ama degaanka.
   iii. Bukaanku ka soo baxay shuruuudaha ku xiran gargaarka cuntada ama barnaamijka cuntada ee dawladdu kabto ee dugsiyada.

iv. Bukaanku ka soo baxay shuruudaha barnaamijyada gobolka ee dadka laga caawiyo daawada loo qoro.
v. Cinwaanka bukaanku degan yahay loo aqoonsan yahay guryaha dadka dakhligoodu hooseeyo ama kirada laga taageero.
vi. Bukaanka loo fidiyo daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah ama isbitaalka loogu diro adeeg dheeraad ah.

b. Talo siinta la Xiriirta Dakhliga U Go'an waxa aad ka heli kartaan:
   i. Goobaha caafimaadka: http://www.centracare.com/app/files/public/1462/Income-Grid-Clinics.pdf
   ii. Isbitaalada Iyo Goobaha Caafimaadka Ee Heer Gobol http://www.centracare.com/app/files/public/1461/Income-Grid-Hospitals.pdf
   iii. Ama in aad soo wacdo Xafiiska Xisaabaadka ee 1-320-255-5613.

E. Nidaamka u degsan CentraCare waa in marka qofku helo gargaarka caafimaadka ee 100%, in la joojiyo dhamaan codsiyada in qofku lacagta bixiyo. Haddii gargaarka bukaanka ka yar yahay 100%, inta soo ka harta ayaa bukaanka laga codsanayaa inuu bixiyo. Bukaanka ayaa mas'uul ka ah inuu bixiyo inta ka hartay lacagta laga bixiyey. Haddii aanu bukaanku markiiba bixin karin inta hartay oo dhan, bukaanka waxaa laga doonayaa inuu nala soo xiriiro si loogu dajiyo qorshe lacag bixin ah.

F. Sababaha soo socda waa kuwa keeni kara in bukaanka loo diido gargaarka maaliyadeed:
   a. Dakhligiisa oo ka sareeya inta la ogol yahay
   b. Haddii uusan codsan in ay lacagta ka bixiyaan Ceymiska Gobolka (Medicaid), Minnesota Care ama Medicare Haddii bukaanku leeyahay ceymis caafimaad ama Medicare, oo aan laga dooneyn inuu codsado Medicaid.
   c. Codsi been abuur ah.
   d. Adeegga loo qabtay oo aan aheyn kuwa loo aqoonsan yahay baahi caafimaad ama qaliin is qurxin ah.
   e. Adeegga dadka aan heysan dhalashada Mareykanka si gaar ah daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah.
   f. Bukaanka oo aan soo gudbin macluumaadkii uu ka codsay ceymiska caafimaadka.
   g. Codsiga aan la wada buuxin, waxaa u furan in ay mar kale codsi soo gudbiyaan. ,
   h. Hantida ka badan tan lagu xusay nidaamkan.

G. Isgaarsiinta Iyo Daabacaadda Gargaarka Maaliyadda
   a. Codsiga gargaarka maaliyadda waa mid lacag la'aan ah oo la siiyo qof kasta oo codsada. Nidaamka codsiga gargaarka maaliyadda waxaa kala taliya bukaanka hay'adada iyo shaqaalaha adeegga bukaanka. Nidaamka Gargaarka Maaliyadda, Xogta Urursan ee Gargaarka Maaliyadda, Codsiga Gargaarka Maaliyadda iyo Jadwalka Bixinta Gargaarka Maaliyadda waxaa laga heli karaa bogga internetka ee CentraCare.com (http://www.centracare.com/pricingfinancial-assistance/) oo aad kala soo dagi kartaan si fudud oo aadan u baahneyn barnaamij gaar ah. Waxaa intaas dheer, qof kasta ayaa codsanaya Nidaamka Gargaarka Maaliyadda, Xogta Urursan ee Gargaarka Maaliyadda, Codsiga Gargaarka Maaliyadda iyo Jadwalka Bixinta Gargaarka Maaliyadda waa mid lacag la'aan ah oo aad soo weydiisan karto Xafiiska Adeegga Bukaanka oo boostada kuugu soo diraya qoraaladaas. Telefoonada aad ku codsan karto qoraaladan waxa ay ku qoran yihiin dhinaca hoose ee saxiixa, warqadaha iyo bogga internetka. Qoraalada inta badan waxa ay ku qoran yihiin afka Ingiriisiga iyo luqadaha ay ku hadlaan dadka tiradoodu ka badan tahay 10% ee bulshada.
   b. Dadka ka soo baxa shuruudaha lagama qaadayo lacag ka badan biilka loo diri lahgaa guud ahaan (inta badan biilasha waxa ay ku saleysan yihiin sharciga 501r) ee xaaladaha degdegga ah iyo baahida caafimaadka ee muhimka ah.
   c. Nidaamka gargaarka maaliyadda oo ku qoran luqad aad u fudud oo la fahmi karo iyo codsiga ama jadwalka gargaarka waxaa laga heli karaa goobta caafimaadka ee aad iska diiwaan gelineyso.

d. Warbixinta biilka ee bukaanka ee lacagta lagu leeyahay waxa wehliya in bukaanku xaq u leeyahay gargaar maaliyadeed iyo luqad fudud oo si faahfaahsan loogu qoray nidaamka gargaarka maaliyadda.
e. Telefoonada lacag ururinta ee ay ku soo diraan shaqaalaha Hay'adda ama shaqaalaha hay'adaha lacag ururinta waxaa ka mid ah in bukaanka la wargeliyo inuu codsan karo gargaarka maaliyadda.
f. Goobaha diiwaan gelinta ee hay'adda, oo ay ka mid yihiin qolka gurmadka degdegga ah, ayaa lagu dhajiyaa ogeysiiska ku saabsan codshada gargaarka maaliyadeed iyo telefoon lambarka uu bukaanku ka heli karo macluumaad dheeraad ah.
g. Macluumaadka ku saabsan gargaarka maaliyadeed waxaa loo qeybiyaa dhamaan hay'adaha degaanka ee wax ka qabta baahida dadka aan dakhliga buuran laheyn.
h. Xubnaha bulshadu waxa ay warbixin kooban oo ku saabsan gargaarka maaliyadda ka heli karaan Xafiiska Gargaarka Maaliyadda iyaga oo la soo xiriiri kara CentrCare ee (320) 255-5622.
i. CentraCare waxa ay la shaqeyneysaa hay'adaha u adeegga dadka dakhligodu yar yahay si ay u gaarsiiyaan bulshadaas nidaamka u degsan gargaarka maaliyadeed CentraCare waxa ay leedahay qeyb madax banaan oo u qaabilsan soo ururinta lacaga oo dadweynuhu ka heli karaan bogga internetka ama ay ka codsan karaan nidaamka Xafiiska Adeegga iyo Maaliyadda ee Bukaanka.

Loo adeegsanayo: Xarumaha CentraCare oo Dhan

La soo saaray: 03/1992

Revised 04/2021